Alberta

**War** saxaafadeed

# Safarro geesiyaal ah, mustaqbalo ifaya: Abaalmarinta Saameynta

Abriil 15, 2025 Weydiimaha warbaahinta Media inquiries

## Dadweynaha reer Alberta waxaa lagu casuumayaa inay magacaabaan qof soo guuray oo wax weyn ku soo kordhiyay bulshadooda ama goobta shaqadooda.

Alberta waxay hoy u tahay dad ka kala yimid daafaha dunida, kuwaas oo badan kood wax weyn ku soo kordhiyay gobolka siyaabo kala duwan sida iskaa wax u qabso, halabuur faneed, curin cusub iyo heer sareynta xirfaddooda ama goobtooda shaqo. Abaalmarinta Saameynta Muhaajiriinta ee Alberta waxaa loo abuuray in lagu xuso laguna dabaaldego waxqabadka iyo guulaha ay gaareen dadka u dhashay dibadda ee Alberta, iyadoon loo eegin muddada ay joogeen gobolka.
Albertans can recognize the accomplishments of immigrant youth, women, entrepreneurs, academics, artists, athletes, and professionals and community builders by nominating someone for an Alberta Immigrant Impact Award.

"Muhaajiriintu waxay door muhiim ah ka ciyaaraan kobaca iyo guusha Alberta. Waxay taageeraan warshadaha aasaasiga ah, hormood u yihiin hal-abuurka, waxayna si aan la koobi karin uga qayb qaataan horumarinta bulshooyinkooda ha ahaato ganacsi, saynis iyo tignoolaji, xirfado kala duwan, tacliinta sare, farshaxanka, cayaaraha ama dadaallada tabarucaadka. Asalkooda iyo waayo aragnimadooda kala duwan waxay Alberta ka dhigaan meel hodan ah oo firfircoon in lagu noolaado. Waa muhiim in la xuso lana dabaaldego waxqabadkooda iyo saameynta togan ee ay ku leeyihiin gobolka."
*Muhammad Yaseen, Wasiirka Socdaalka iyo Dhaqamada Kaladuwan*

Magacaabista waxaa lagu qiimeeyaa shuruudo ay ka mid yihiin guud ahaan waxqabadka qofka la magacaabay, sida ay ficilladoodu u buuxiyeen baahi iyo saameynta ay ku yeesheen dadka kale, iyo sida ay u muujiyeen hoggaanimo iyo hal abuur marka ay xal u raadinayaan dhibaatooyinka. Magacaabista waxay furan tahay laga bilaabo Abriil 15 ilaa duhurnimada Juun 18, waxaana dhici doona xaflad lagu aqoonsanayo dadka abaalmarinta hela dhamaadka dayrta 2025.

Classification: Public

Booqo Alberta.ca/ImmigrantImpactAwards si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah ama u magacaabto qof.

## Xog kooban

Abaalmarintu waxay ka kooban tahay siddeed qaybood:

- Farshaxanka iyo Cayaaraha, Waxqabadka, Shaqo iyo Tacliinta, Ruuxa Ganacsiga, Muhaajirka Heer Sare, Meel Shaqo oo Isku Dhafan, Horumarinta Bulshooyinka Yar-yar, Saameynta Haweenka Muhaajiriinta, Hogaamiye Dhalinyaro.
- Hal qof ka badan ayaa lagu abaalmarin karaa qayb kasta.
- Si qof u qalmo in la magacaabo, waa inuu buuxiyaa shuruudahan:
    - Waa inuu yahay qof shaqsi ah (ma aha koox ama hay’ad).
    - Waa inuusan horey u helin abaalmarin la mid ah oo ka timid Dowladda Alberta.
    - Waa inuu ku dhashay meel ka baxsan Kanada (laakiin wuxuu Kanada joogay muddo dheer waa la oggol yahay).
    - Waa inuu yahay muwaadin Canadian ah ama degane rasmi ah.
    - Waa inuusan lahayn xukun dambiyeed aan cafis laga helin.
    - Waa inuusan ahayn qof xil dadweyne haya.
    - Waa inuu ku sugan yahay gobolka Alberta marka la magacaabayo.
    - Waa inuu si muuqata wax ugu soo kordhiyay dhaqaalaha ama nolosha bulshada ee Alberta.
- Magacaabista waa in lagu gudbiyaa mareegta internetka ee loo asteeyay arrintan.

## Macluumaad la Xiriira

- Abaalmarinta Saameynta Muhaajiriinta ee Alberta (Alberta Immigrant Impact Awards)

## Weydiimaha warbaahinta

### Neil Singh

780-422-3559
Xoghayaha Saxaafadda, Socdaalka iyo Dhaqamada Kala Duwan

Classification: Public